

## Suurat At-Takwiir

## سُورَةُ التَّكْوِيْنِ

Magaca Eebe yaan ku billaabaynaa ee naxariis guud iyo mid gaaraba naxariista.

1. Marka qorraxda la duubo (Qiyaamada).
2. Xiddiguhuna daataan (iyagoo Madow).
3. Buurahana la kexeeyo (La rujiyo).
4. Geelii rimmanaana la halleeyo.
5. Dugaaggana la kulmiyo (Qisaas darteed).
6. Badahana la kululeeyo.
7. Naf walbana Jidhkeedii lagu lammaaneeyo.
8. Gabdhihii la xabaalnololiyayna la warsado.
9. Maxaa dambi ah oo loo dilay.
10. Kutubta (camalkana) la fidiyo.
11. Samadana la rujiyo.
12. Naarta Jaxiimana la huriyo.
13. Jannadana la dhaweeyo.
14. Waxay ogaan nafu waxay camal fashay.

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

إِذَا الشَّمْسُ كُوِّرَتْ ﴿١﴾

وَإِذَا النُّجُومُ انْكَدَرَتْ ﴿٢﴾

وَإِذَا الْجِبَالُ سُيِّرَتْ ﴿٣﴾

وَإِذَا الْعِشَارُ عُطِّلَتْ ﴿٤﴾

وَإِذَا الْوُحُوشُ حُشِرَتْ ﴿٥﴾

وَإِذَا الْبِحَارُ سُجِّرَتْ ﴿٦﴾

وَإِذَا النُّفُوسُ زُوِّجَتْ ﴿٧﴾

وَإِذَا الْمَوْءِدَةُ سِيلَتْ ﴿٨﴾

بِأَيِّ ذَنْبٍ قُتِلَتْ ﴿٩﴾

وَإِذَا الصُّعُفُ نُشِرَتْ ﴿١٠﴾

وَإِذَا السَّمَاءُ كُيِّسَتْ ﴿١١﴾

وَإِذَا الْجَحِيمُ سُعِّرَتْ ﴿١٢﴾

وَإِذَا الْجَنَّةُ أُرْفُتْ ﴿١٣﴾

عَلِمَتْ نَفْسٌ مَّا أَحْضَرَتْ ﴿١٤﴾

Eebe isagaa wax walba abuuray, wuxuu doonana wuu falaa. Qiyaamadu markay imaanna wuxuu muujin calaamooyiin iyadoo Ruux walba Eebe tusin wuxuu Adduunka ku camal-falay, kana abaal-marin Khayr iyo sharba.

Abuu hurayra wuxuu ka wariyay Nabiga «Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee»: Qorraxda iyo Dayaxa waa la duubi Maalinta Qiyaame. At-Takwiir (1-14).

15. Waxaan ku dhaartay « buu Eebe yidhi » Xiddigaha Qarsooma (Maalintii).

فَلَا أَقِيمُ بِالْخَنَسِ ١٥

16. Ee socda iftiinka Qorraxdana ku qarsooma.

الْجَوَارِ الْكُنَسِ ١٦

17. Iyo Habeenku markuu jeedsado.

وَالَيْلِ إِذَا عَسَسَ ١٧

18. Iyo subaxu markuu soo qaabilo.

وَالصُّبْحِ إِذَا نَفَسَ ١٨

19. Ee Quraanku waa hadalka Eebe, Soona raray Malag sharaf lah.

إِنَّهُ لَقَوْلُ رَسُولٍ كَرِيمٍ ١٩

20. Xoogna leh Eeba agtiisana Daraja ku leh.

ذِي قُوَّةٍ عِنْدَ ذِي الْعَرْشِ مَكِينٍ ٢٠

21. Laguna addeeco halkaas aaminna ah.

مُطَاعٍ ثَمَّ أَمِينٍ ٢١

22. Saaxiibkiinna (Nabiguna) ma aha ku waalan.

وَمَا صَاحِبُكُمْ بِمَحْجُونٍ ٢٢

23. Horaybuuna ugu arkay Jibriil Jahadii Caddayd (Bariga Maka).

وَلَقَدْ رَآهُ بِالْأُفُقِ الْمُبِينِ ٢٣

24. Nabiguna ma aha Ruux lugu shakiyo waxa Maqan.

وَمَا هُوَ عَلَى الْغَيْبِ بِضَنِينٍ ٢٤

25. Quraankuna ma aha hadal shaydaan la fogeeyay.

وَمَا هُوَ بِقَوْلِ شَيْطَانٍ رَجِيمٍ ٢٥

26. Ee xaggeed Gaalooy aadaysaan.

فَأَن تَذَهَبُونَ ٢٦

27. Quraankuna waxaan waanada caalamka ahayn ma aha (waa waano).

إِنْ هُوَ إِلَّا ذِكْرٌ لِلْعَالَمِينَ ٢٧

28. Ruuxii doona inuu toosnaado (yuuna u yahay).

لِمَنْ شَاءَ مِنْكُمْ أَنْ يَسْتَفِيمَ ٢٨

29. Waxna ma dooni kartaan in Eebaha Caalamku doona mooyee.

وَمَا شَاءَ مِنْكُمْ إِلَّا أَنْ يَشَاءَ اللَّهُ رَبُّ الْعَالَمِينَ ٢٩

Xiddigaha iyo khalqiga kalaba dhammaantiis Eebaa abuuray, wuxuuna Eebe ugu dhaartay Qiimohooda iyo say wax la yaab leh u yihiin, Quraankuna waa hadalkii Eebe ee u malaku Jibriil u soo dhiibay si uu Nabiga Muxammad ah Naxariis iyo nabadgalyo korkiisa Eebe ha yeelee u gaadhsiyo, isna Caalamka u gudbiyo, waxaana lagu yaqaan Nabiga Ammaano, Run, Caqli iyo gaadhsiin xaqa Sida Nabiyada kaleba. Markay soo dagtay Aayaddan: (Ruuxiinnii doona inuu toosnaado) yuu Abuu Jahal yidhi: Amarka annigaa iska leh, haddaan doonno waan toosnaanhaynaa, haddaan doonnana ma toosnaanhayno, markaasaa Eebe soo dajiyay korahaaye (wax ma dooni kartaan in Eebaha Caalamku doono mooyeen). At-Takwiir (15-29).